# Heshiiskii Kenya iyo Soomaaliya

*Ka yimid bogga 1aad*

Dhanka Kenya, Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Heshiiska saxiixay, waxaa ku weheliyey: 'Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda Mr. Thuita Mwangi, Waxaa kaloo ku weheliyey Agaasimaha Arrimaha Siyaasadda ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda, Danjire Ben Ogutu. Waxaa kaloo ku weheliyey Madaxa Waaxda Sharciyada ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda, Mr. James Kihwaga, iyo kuwo kale'.

Isla markaas, War-saxaafadeed ay Dawladda Kenya ka soo saartay heshiiska, oo nuqul ka mid ah Wargeyska Kasmo helay, wuxuu sheegayaa in saxiixa Heshiiska ay markhaati (Witness) ka ahaayeen Ambassador Longve Hans Wilhelm Lataliyaha Gaarka ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Dalka Norway. Waxaa kalo markhaatiga ka mid ahaa haweeneyda lagu magacaabo Rina Kristmoen oo ka mid ah saraakiisha Safaaradda Norway ee Nairobi.
Halkaas, joogitaanka Markhaatiga 'Norway' waxaa ka dhalanaya weyddiimo hor leh, oo ay ka mid yihiin:-

- Yaa ku casumaay goobta saxiixa, maxaase loogu casuumay Markhaati in ay ka ahaadaan wafdi ka socda Norway, marka saxiixa Soomaaliya iyo Kenya dhacayo?
- Dawladda Soomaaliya arrintaas hore ma ula socotay, oo ma ka war-gashanayd in qolo seddexaad markhaati ka noqonayso kala saxiixashada Heshiiska?
- Maxaa loogu baahday markhaatiga, haddiise loo baahnayo, muxuu u noqday dalka Norway?

Ugu dambeys, su'aasha ugu muhiimsani waa: Dawladda Soomaaliyeed ee KMG ahi, dalka inta ay ka talisaana kooban yahay, xilliga ay jiraysaa xadidan yahay, aan ku imaan kalsoonida dadka Soomaaliyeed, Awood sharciyeed ma u leedahay in ay gasho heshiis ku saabsan kala xadidda xuduudo laba qaran?

**Akhristayaasha Kasmo**
Waxaan jeclaan lahayn in ay halkan noogu soo gudbiyaan waxa ay la tahay, iyo waxa ku habboon in aan qabanno ee ku saabsan Heshiiskan.
Ku soo dir fikarkaaga:
info@kasmonewspaper.com


Wasiirka Arrimaha Dibeda Hon. Moses Wetang'ula iyo Abdirahman Abdishakuur Wasiirka Qorshaynta iyo Iskaashiha Caalamiga ah

**Shil ma kugu gaaray:**
**Jidka, Shaqada, safar ama kufid?**

**Accident Claims Centre**
**Waxay kuu ballan-qaadaysaa 99% guul:**

* Heerka ugu sarreeya magdhow
* Degdeg loo bixiyo madhowga
* Lawyer aqoon u leh dhaawacyada dadka
* La talin sugan oo lacag la'aan ah
* Haddii baabuur / Minicab shil kaaga dhaco, 24 saac gudahood lagu siiyo mid kale.
* 100% magdhow ah, aan wax laga dhimin

**Freephone: 08000 715 714**

Advertising in Kasmo Newspaper
Contact: Tel 020 8962 0675
Mobile: 0795 797 4885

Brent Refugee Forum
Suite 3, Moran House, 2nd floor
449-451 High Road, London NW10 2JJ
**Contact: 020 8459 9093**
**Mob: 0795 760 9581**

HVM
Haze Vehicle Management
Accident Claim Company

FREE PHONE
0800 731 5118

NO WIN NO FEE
- Replacement Car
- P.C.O. Registered car for minicab Drivers
- Loss of earnings
- When you are not insured but its not your fault
- Personal injury
- Protection of no-claim discount

59 - Coldharbour Lane Hayes Middlesex London UB3 3EE
Tel: 020 8813 6161 Fax: 020 8573 8222
website: www.hvmonline.co.uk email: claim@hvmonline.co.uk